

**XAASHIDA XAQIIQDA EE LOOGU TALA GALAY DADKA  
DARYEELKA LA SIIYO IYO DARYEEL BIXIYEYAASHA**

**OGOLAANSHAHA ISTICMAALKA XAALADDA  
DEGDEGGA AH (EUA) EE  
TALLAALKA NOVAVAX EE COVID-19 ADJUVANTED, EE LOOGU  
TALA GALAY KAHORTAGGA XANUUNKA CORONAVIRUS 2019  
(COVID-19)**

**Waxaa lagu siinayaa tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted, Ee Loogu Talagalay kahortagga Xanuunka Coronavirus 2019 (COVID-19) ee uu keeno xanuunka daran ee neef-mareenka ee coronavirus 2 (SARS-CoV-2).**

**Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted, wuxuu Ogolaanshaha Isticmaalka Degdegga ah (EUA) uu ka helay Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka ee Mareykanka (FDA) si loo siiyo tixanaha aasaasiga ah ee labada kuuro dadka jira 18 sano iyo ka weyn.**

Xaashida xaqiiqdu waxay ka kooban tahay xog kugu caawinaysa inaad fahamto halista iyo faaiidooyinka tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted kaasi oo aad qaadan karto maadaama uu haatan jiro safmarka COVID-19. La hadal bixiyahaaga tallaalka haddii aad qabto su'aalo.

Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted waxaa laga yaabaa inuusan qof walba badbaadin.

Xaashidaan Xaqiiqda waxaa laga yaabaa in la cusbooneysiisay. Si aad u hesho Xaashidii Xaqiiqada ee ugu dambaysay, fadlan booqo <http://www.NovavaxCovidVaccine.com>.

**WAXA AY TAHAY INAAD OGAATO KA HOR INTA AADAN QAADAN**

**TALLAALKAAN**

**WAA MAXAY COVID-19?**

COVID-19 — waxaa sababa fayraska corona ee lagu magacaabo SARS-CoV-2. Noocaan coronavirus-ka ah horay looma arag. Waxaad ka qaadi kartaa COVID-19 taabashada qof kale oo qaba fayraska. Badi waa xanuun neef mareenka ku dhaca laakiin sidoo kale saamayn kara xubnaha kale. Dadka qaba COVID-19 waxay yeeshaan astaamo badan sida lasoo tebiyo, kuwaasi oo ka bilaabma astaamo fudud ilaa jirrooyin daran. Astaamuhu waxay soo bixi karaan 2-14 maalmood kadib markaad u baylahdo fayraska. Kuwaan waxaa ku jira: qandho ama qarqaryo; qufac; neefta oo kugu yar; daal; murqo ama jir xannuun, madax xanuun; lumida cusub ee dhadhanka ama urta; cune xanuun; calool istaag ama sanko oo diif ka dareerayo; lallabo ama mantag; shuban.

**WAA MAXAY TALLAALKA NOVAVAX COVID-19, ADJUVANTED?**

Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted waa tallaalkaan la ansixin oo ka hortagi kara COVID-19.

FDA waxaa ay ogolaatay isticmaalidda degdegga ah ee Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted si looga hortago COVID-19 inuu ku dhaco dadka jira 18 sano iyo ka weyn sida uu qabo EUA.

Si aad u hesho xog badan oo ku saabsan EUA, eeg **“Waa maxay Ogolaanshaha Isticmaalka Xaaladda Degdegga ah (EUA)?”** qeybta ah dhammaadka Xaashidaan Xaqiiqada.

## **WAA MAXAY WAXA AAD USHEEGI LAHAYD BIXIYAHA TALLAALKAAGA KA HOR INTA AADAN QAADAN TALLAALKA NOVAVAX COVID-19 ADJUVANTED?**

Usheeg bixiyahaaga tallaalka dhammaan xaaladahaaga caafimaadka, oo ay kujiraan haddii aad

- qabtid wax xasaasiyad ah
- qabtid bararka murqaha wadnaha ama bararka xuubka sare ee wadnaha
- qabtid qandho
- qabtid cillad dhanka dhiigbaxa ah ama aad qaadato dawo dhiigga inuu fariisto kacelisa
- qabtid liidasho dhanka difaaca jirka ah ama aad qaadatid dawooyin saameeya nidaamkaaga difaaca
- uur leedahay ama aad qorshaynayso inaad uur yeelato
- naas nuujinayso
- qaadatay tallaalka COVID-19
- waligaa mar un suuxday kadib markii cirbad lagugu duray

## **YAY TAHAY INUUSAN QAADAN TALLAALKA NOVAVAX COVID-19 ADJUVANTED?**

Waa inaad qaadan tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted haddii aad:

- qaaday xasaasiyad daran kadib markii aad qaadatay kuuro hore oo tallaalkaan ah
- qaaday xasaasiyad daran kadib markii aad qaadatay kuuro hore oo tallaalkaan ah

## **WAA MAXAY WAXYAABAHA KUJIRA TALLAALKA NOVAVAX COVID-19 ADJUVANTED?**

Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted waxaa kujira qaabka dib u habaynta borootiinka spike ee SARS-CoV-2 oo laga soo saaray unugyada cayayaanka ee baculovirus Sf9 (gooryaanka dayrta) iyo Matrix- M™ maadada adjuvant ee tallaalka oo ay kujiraan saponins laga soo saaray geedka soapbark (*Quillaja saponaria* Molina). Waxyaabo kale oo kujira waa kolostarool, phosphatidylcholine, potassium dihydrogen phosphate, potassium chloride, disodium hydrogen phosphate dihydrate, sodium chloride, disodium hydrogen phosphate heptahydrate, sodium dihydrogen phosphate monohydrate, polysorbate 80, iyo biyo duritaanka loogu tala galay. Tallaalka waxaa laga yaabaa inuu sidoo kale ka kooban yahay xoogaa ah baculovirus iyo borotiinnada unugyada cayayaanka iyo DNA.

## **SIDEE DADKA LOO SIIYAA TALLAALKA NOVAVAX COVID-19?**

Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted cirbad ahaan ayaa muruqa lagaaga mudayaa.

Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted waxaa loo bixiyaa sidii tixane labo kuuro ah oo 3 asbuuc ay u dhexeyso.

## **MIYAA HORAY LOO ISTICMAALAY TALLAALKA NOVAVAX COVID-19 ADJUVANTED?**

Tallaalka COVID-19 Adjuvanted waa tallaalka aanan la ansixin. Baritaannada caafimaadka, qiyaastii 25000 oo qof oo jira 18 ama ka weyn ayaa qaatay labo kuuro oo ah Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted.

## **WAA MAXAY FAAIIDOOYINKA LAGA HELO TALLAALKA NOVAVAX COVID-19 ADJUVANTED?**

Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted waxaa la muujiyay inuu ka hortago COVID-19. Mudada uu difaaci karo COVID-19 waqtigaan lama oga.

## **WAA MAXAY HALISTA UU LEEYAHAY TALLAALKA NOVAVAX COVID-19 ADJUVANTED?**

Waa wax aan aad u badnayn in Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted uu sababi karo xasaasiyad daran. Xasaasiyad daran waxay caadiyan dhici kartaa dhowr daqiiqo gudahood ilaa hal saac markii qofka lagu duro Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted. Sababtaan darteed, bixiyaha tallaalkaaga ayaa kuweydiin kara meesha aad kusoo qaadatay tallaalkaaga si uu kuula socdo tallaalka kadib. Calaamadaha xasaasiyadda daran waxaa kujiri kara:

- Neefsashada oo adkaata
- Barar wajiga iyo cunaha ah
- Wadne garaac aad ah
- Finan kasoo yaaca jirka oo dhan
- Wareer iyo tabar darro

Bararka murqaha wadnaha ama bararka xuubka sare ee wadnaha ayaa ku dhacay dadka qaatay tallaalkaan qaarkii. Dadka qaarkii, calaamadaha ayaa bilowday 10 maalmood tallaalka kadib. In arrinkaani dhaco aad ayay u yartahay. Waa inaad daryeel caafimaad durba raadsataa haddii wax kamid ah calaamadahaan aad isku aragto markii tallaalkaan aad qaadato kadib.

- Xabad xanuun
- Neef-qabasho
- In aad dareemeyso inay neeftaadu degdeg tahay, wadnaha oo ruxanaaya ama aad u garaacmaha

Dhibaatooyinka lagala kulmi karo ee lagu soo tebiyay baaritaan caafimaad oo lagu sameeyay Tallaalka Novavax COVID-19 waxaa kujira:

- Bararka murqaha wadnaha.
- Bararka xuubka sare ee wadnaha
- Falcelin meesha cirbadda lagu muday ah: xanuun/jileec, barar, gaduudasho iyo cuncun
- Waxyeellada guud: daal ama guud ahaan in qofku dareemo inuusan fayoobeyn, murqa xanuun, madax xanuun, kala goysyada oo xanuuna, lallabo, mantag, qandho, iyo qarqaryo
- Falcelin xasaasiyad ah sida cuncun iyo barar wajiga ah
- Qanjir barar

Waxyeellooyinka lasoo tebiyay ee Tallaalka Novavax COVID-19 intii la waday  
isticmaalka ka dambeeya ogolaanshaha ee dalal kabaxsan Mareykanka waxaa kujira:

- Falcelinta xasaasiyadeed ee daran
- Bararka murqaha wadnaha.
- Bararka xuubka sare ee wadnaha

Waxaa dhici karta inaysan dhicin waxyeellada suurtagalka ah dhammaanteed ee Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted. Waxyeello halis ah oo aan la fileyn ayaa dhici karta. Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted wali daraasad iyo baaritaanno caafimaad ayaa kusocda.

### MAXAAN KA YEELAYAA WAXYEELADIISA?

Haddii xasaasiyad daran aad la kulanto, soo wac 9-1-1, ama aad isbitaalka kuugu dhow.

Wac bixiyaha tallaalka ama bixiyaha caafimaadka haddii ay kusoo gaaraan waxyeello kudhiba ama aanan baxayn.

Usoo sheeg waxyeellada tallaalka FDA iyo Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC) **Nidaamka Soo Tebinta Dhacdada Daran ee Tallaalka (VAERS)**. Nambarka lacag la'aanta lagu soo waco ee VAERS waa 1-800-822-7967 ama onlayn kusoo gudbi <https://vaers.hhs.gov/reportevent.html>. Fadlan kusoo dar "Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted EUA" sanduuqa ugu horreeya ee #18 ee foomka warbixinta.

Intaasi waxaa dheer, waxaad usoo tebin kartaa waxyeellada Novavax, Inc., adigoo isticmaalaya xogta xiriirka ee hoos lagu xusay

Websaydka	Fakis nambar	Geli lambarka taleefoonka
<a href="http://www.NovavaxMedInfo.com">www.NovavaxMedInfo.com</a>	1-888-988-8809	1-844-NOVAVAX (1-844-668-2829)

Waxaa sidoo kale lagu siin karaa xulashada aad isaga diiwaangalinayso **v-safe**. **V-safe** waa aalad cusub oo ikhtiyaari ah oo ku saleysan taleefannada casriga ah oo adeegsata farriimaha qoraalka iyo xog-uruurinta websaydhka si loola socdo dadka la tallaalay oo loo aqoonsado waxyeellada iman karta kadib tallaalka COVID-19. **V-safe** wuxuu weyddiyaa su'aalo ka caawinaya CDC la socodka badbaadada tallaalka COVID-19. **V-safe** wuxuu sidoo kale bixiyaa xasuusin kuurada labaad ah haddii loo baahdo iyo dabagalka taleefanka ee tooska ah ee ay sameyso CDC haddii kaqeybgalayaashu ay soo sheegaan saameyn caafimaad oo weyn kadib talaalka COVID-19. Wixii xog ah oo dheeraad ah oo ku saabsan sida la isu diiwaan galiyo, booqo: [www.cdc.gov/vsafe](http://www.cdc.gov/vsafe).

### MAXAA DHACAYA HADDII AANAN QAADAN TALLAALKA NOVAVAX COVID-19 ADJUVANTED?

EUA sida uu qabo, waa khiyaarkaaga inaad qaadato ama aadan qaadan Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted. Haddii aad go'aansato inaad qaadan, taasi baddalimayso daryeelkaaga caafimaad ee heerka la wada aqbalay gaarsiisan.

## **MIYAY JIRAAN XULASHOYIN KALE OO LOOGU TALA GALAY KA HORTAGGA COVID-19 OO AAN AHAYN TALLAALKA NOVAVAX COVID-19 ADJUVANTED?**

Xulashooyin kale oo loogu tala galay ka hortagga COVID-19 waa COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA) iyo SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA), FDA-tallaalada COVID-19 ee uu ansixiyay. Tallaalo kale oo looga hortago COVID-19 waxaa laga yaabaa in la heli karo ayna hoos imaanayaan EUA.

## **MIYAAN LA QAADAN KARAA TALLAALKA NOVAVAX COVID-19 ADJUVANTED TALLAALADA KALE HAL MAR?**

Macluumaad looma soo gudbin FDA ku saabsan bixinta Tallaalka COVID-19 Adjuvanted ayadoo lala qaadanayo hal mar tallaalo kale. Haddii aad ka fakareyso la qaadashada Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted tallaalo kale hal mar, xulashooyinkaaga kala hadal bixiyahaaga caafimaadka.

## **KA WARAN HADDII AAN UUR LEEYAHAY AMA AAN ILMO NAAS NUUJIYO?**

Haddii aad uur leedahay ama aad ilmo naas nuujiso, kala hadal xulashooyinkaaga bixiyahaaga caafimaadka.

Waxaa jira diiwaanka baylah noqoshada uurka oo la socda natiijooyinka uurka ee dumarka dhexdooda ah kuwaasi oo baylah u noqday Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted inta ay uurka leeyihiin. Dumarka lagu tallaalay Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted inta ay uurka leeyihiin waxaa lagu dhiirigelinayaa inay iska diiwaangaliyaan diiwaanka ayagoo booqanaya <https://c-viper.pregistry.com/>.

## **MIYAA TALLAALKA NOVAVAX COVID-19 ADJUVANTED UU IGU RIDI DOONAA COVID-19?**

Maya. Tallaalka Novavax COVID-19 Adjuvanted kuma jiro SARS-CoV-2 kamana qaadi kartid COVID-19.

## **XAFIDO KAARKAAGA TALLAALKA**


Markii aad qaadato kuurada kuugu horreysa, waxaa lagu siin doonaa kaar tallaal si lagu tuso marka aad usoo laabanayso kuurada labaad ee Novavax COVID-19 Adjuvanted. Xasuusnoow inaad la timaado kaarkaaga markii aad soo laabanayso.

## **MACLUUMAAD DHEERAAD AH**

Haddii aad qabto su'aalo booqo mareegta ama soo garaac taleefan

nambarrada hoos lagu qoray. Si aad u hesho Xaashidii Xaqiiqda ee ugu

dambeysay, fadlan iskaan garee koodhka QR ee hoos lagu qoray.

<b>Mareegta Tallaalka Novavax COVID-19</b>	<b>Geli lambarka taleefoonka</b>
<p data-bbox="282 281 748 312"><a href="http://www.NovavaxCovidVaccine.com">www.NovavaxCovidVaccine.com</a></p> 	<p data-bbox="1021 373 1235 520">1-844- NOVAVAX (1- 844-668-2829)</p>



## **SIDEEN INTAAN WAX KA BADAN U OGAAN KARAA?**

- Weydii bixiyaha tallaalka
- Booqo mareegta CDC ee ah <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/index.html>
- Booqo mareegta FDA ee ah <https://www.fda.gov/emergency-preparedness-and-response/mcm-legal-regulatory-and-policy-framework/emergency-use-authorization>
- Waaxda caafimaadka dadweynaha ee dowlada hoose ama gobolkaaga la xiriir

## **XAGEE AYAA XOGTA TALLAALKEYGA LAGU DIIWAAN GALINAYAA?**

Bixiyaha tallaalka ayaa laga yaabaa inuu kusoo daro xogtaada tallaalka Nidaamka Xogta Tallaalka ee deegaankaaga maxalliga ah/gobolka (IIS) ama nidaam kale oo loo qoondeeyay. Tani waxay xaqiijin doontaa inaad hesho isla hal tallaalka markii aad usoo laabato kuurada labaad. Si aad u hesho wixii xog ah oo dheeraad ah oo kusaabsan IISs, booqo: <https://www.cdc.gov/vaccines/programs/iis/about.html>.

## **MIYAA LA IGA QAADAYAA KHIDMAD LOOGU TALA MAAMULKA OO LOOGU TALA GALAY QAADASHADA TALLAALKA COVID-19?**

Maya. Hadda waqtigaan bixiyuhu kaama qaadi karo qarashka kuurada tallaalka lagaamana qaadi karo qarash ku baxaya tallaalka oo jeebkaaga aad ka bixinayso ama qarash kale haddii un aad qaadanayso tallaalka COVID-19. Si kastaba ha ahaatee, bixiyeyaasha tallaalka ayaa dooni kara dib usoo celinta habboon ee qarashkii baxay oo ka imaanaya barnaamij ama qorshe loogu tala galay qarashka bixinta tallaalka COVID-19 kaasi oo loogu tala galay dadka qaadanaya tallaalka (caymis gaar ah, Medicare, Medicaid, HRSA COVID-19 Barnaamijka Dadka Aan La Caymin ee loogu tala galay dadka qaadanaya tallaalka ee aan la caymin).

## **XAGEEN USOO TEBIN KARAA KIISASKA XATOYADII LAGA SHAKIYO?**

Dadkii ogaada xadgudubyo dhici kara oo ka dhan ah Barnaamijka Tallaalka ee COVID-19 ee CDC waxaa lagu dhiirigelinayaa inay usoo tebiyaan Xafiiska Baaraha Guud, Waaxda Mareykanka ee Caafimaadka iyo Adeegyada Insaanka ayagoo soo garaacaya 1-800-HHS-TIPS ama [TIPS.HHS.GOV](https://www.hhs.gov/tips).

## **WAA MAXAY BARNAAMIJKA TILLAABOYINKA MAGDHAWGA DHAAWACA?**

Barnaamijka Tillaabooyinka Magdhawga Dhaawaca (CICP) waa barnaamij heer federaal ah oo gacan ka geysan kara bixinta qarashka daryeelka caafimaadka iyo qarashyo kale oo gaar ah oo loogu tala galay dad gaar ah oo si halis ah ugu dhaawacmay dawooyin ama tallaalo uu tallaalkaana kujiro. Guud ahaan, sheegasho waa in loo soo gudbiyo CICP hal (1) sano gudihii laga bilaabo taariikhda maalinta la qaatay tallaalka. Si aad wax badan uga ogaato barnaamijkaan, booqo [www.hrsa.gov/cicp/](https://www.hrsa.gov/cicp/) or call 1-855-266-2427.

## **WAA MAXAY OGOLAANSHAHA ISTICMAALKA DEGDEGGA AH (EUA)?**

EUA waa qaab lagu fududeeyo helitaanka iyo isticmaalka wax soo saarro caafimaad oo ay kujiraan tallaalkada inta ay socdaan xaalado degdeg ah oo kusaabsan

caafimaadka dadweynaha sida safmarka haatan socda ee COVID-19. EUA waxaa taageera Xoghayaha Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (HHS) caddeyntiisa ah in daruufo jiraan loogu cudurdaarayo isticmaalka degdegga ah ee dawada iyo wax soo saarka bayolajiga ah inta uu socdo safmarka COVID-19. Ogolaanshaha isticmaalka degdegga ah uma uusan marin isla nooca dib u eegidda ah ee FDA ka sidii wax soo saar ansixin ka helay FDA.

FDA waxaa laga yaabaa inuu soo saaro EUA markii shardi gaar ah la waafaqo taasoo ay kujirto inaysan jirin baddallo la heli karo oo ku filan oo la ansixiyay. Intaasi waxaa dheer, go'aanka FDA waxaa uu ku salaysan yahay guud ahaanshaha caddeynta sayniska ee la heli karo ee muujinaysa in wax soo saarku uu wax ku ool u yahay ka hortagga COVID-19 inta uu jiro safmarka COVID-19 oo faaiidooyinka la ogsoon yahay ee la heli karo ee wax soo saarka ayaa ka miisaan badan halista la ogsoon yahay ee imaan karta ee wax soo saarka. Shardigaasi ideylkii waa in la waafaqo si loo ogolaado wax soo saarka in la isticmaalo inta uu jiro safmarka COVID-19.

EUA wuxuu shaqeynayaa inta ay shaqeyneyso caddeynta EUA ee COVID-19 taasi oo u cudurdaareysa isticmaalka degdegga ah ee wax soo saarkan, haddii aanan la joojin ama aanan laga noqon (taasoo intaasi kadib wax soo saarka aanan lasii isticmaali kareyn).

Waxaa loo soo saaray:

Novavax, Inc., Gaithersburg, MD, 20878

C20101US-001

Dib loo eegay: Luulyo 13, 2022

©2022 Novavax, Inc. Dhammaan xaquuqda way dhawrsan tahay.



Iskaan garee Xaashidaan Xaqiiqda si aad u duubto in tallaalka qofka lasiiyay si loo galiyo diiwaanka caafimaadka ee elektaroonigga ah/nidaamyada xogta tallaalka.

GDTI: 0886983000370